

Golaha Qaxootigu (Refugee Council) waa hay'ad samo-fal oo madax-banaan oo khibrad ah sannado badan u leh la-shaqeynta magangalyo-doonka iyo qaxootiga. Waxa aanu bixinaa tiro balaadhan oo ah adeegyo bilaash ah oo lagu bixiyo afaf badan oo kala duwan si gargaar looga geysto haqabtirka baahidaada.

Maxaanu qabanaa?

Goobta Adeegga (One Stop Service) ee Golaha Qaxootiga ee ku taala West Midlands waxa uu gargaara magangalyo-doonka iyo qaxootiga jooga gudaha iyo agagaarka Birmingham, Wolverhampton, Stoke-on-Trent iyo Coventry.

Waxa aanu gargaar ka geysan karnaa arrimaha la xidhiidha raashinka iyo hoyga, kuwaasoo ay bixiso Hay'adda Xuduudka ee Boqortooyada Midowday (UK Border Agency - UKBA).

Fadlan la soco in Golaha Qaxootigu aanu masuul ka ahayn go'aamada la gaadho ee ku saabsan codsiyada aad u gudbisid UKBA ama ku saabsan codsigaaga magangalyada.

Haddii aad tahay magangalyo-doon imminka uun yimi Boqortooyada Midowday (UK), waxa aanu:

- Kaa gargaari karnaa inaad ka fiirsatid wixii kaaga banaan gargaarka raashinka iyo/ama hoyga, waxa kale oo aanu kuu sharixi karnaa habka taageerada ama kaalmada dawladda.

- Kaa gargaari karnaa inaad heshid hoy bilaabis ah, haddii uu kuu banaan yahay.
- Kuu sheegi karnaa waxa dhaca marka hoy lagaa siiyo meel kale oo ku taala Boqortooyada Midowday (UK) (taasoo loo yaqaano 'kala-firdhin').
- Ku siin karnaa war ku saabsan adeegyo kale oo ku gargaari karaa.

Haddii aad imminkaba tahay magangalyo-doon taageero ka qaata UKBA, waxa aanu:

- Kaa gargaari karnaa dhibaatooyinka ka yimaada habka UKBA.
- U sheegi karnaa UKBA wixii ah isbeddelo ee xaaladdaada ku yimaada.
- Kaa gargaari karnaa dhibaatooyinka la xidhiidha hoyga.
- Kuu sheegi karnaa hay'adaha beesha ee qaxootiga ama hay'ado kale oo bixiya gargaar mudo dheer ah.

Waxa aanu kaa gargaari karnaa inaad racfaan ama ambiil qaadatid haddii dawladdu diido codsigaaga raashinka iyo hoyga. Fadlan la soco in aan Golaha Qaxootigu masuul ka ahayn natiijada ka soo baxda racfaan.

Hay'dda Xuduudka ee UK (UK Border Agency - UKBA) waa hay'ad dawladeed oo masuul ka ah bixinta raashin iyo hoy la siiyo magangalyo-doonka.

Waxa kale oo aanu:

- Ku siin karnaa talo iyo gargaar caruurta magangalyo-doonka ah ee waalidku ka maqan yahay ee da'doodu ka yar tahay 18 sannadood.
- Kuu sheegi karnaa xuquuqdaada iyo wixii lagu oggol yahay marka aad heshid go'aan ku saabsan codsigaaga magangalyada.
- Ku siin karnaa talo teleefonka lagu bixinayo.

Haddii aad u baahan tahay la-talin sharci

Ma bixino la-talin sharci iyo wakiilnimo sharci, laakiin waxana aanu kaala talin karnaa xuquuqdaada iyo macnaha sharciga. Haddii aanaanu ku gargaari karin, waxa aanu ku siin doonaa liis wakiilo sharci oo aad la xidhiidhi kartid ama waa aanu kuu gudbin doonaa.

Turjubaano

Waxa goobta noo jooga turjubaano iyo shaqaale laba af ku hadla si baahidaada afka loo haqabtiro

Sida loo isticmaalo adeegyadayada

Waxa aad xafiiskayaga Birmingham soo booqan kartaa Isniinta, Salaasada Khamiista iyo Jimcaha inta u dhexeysa 9.30 subaxnimo iyo 5.00 galabnimo. Adeegyada aan ballanta lahayn waxa uu ku kooban yahay kaliya kediska maalmaha arbacada.

Haddii aad degan tahay **Stoke-on-Trent** waxa aad booqan kartaa adeeggayada la iska iman karo ee todobaadlaha oo ah maalinta Jimcaha inta u dhexeysa 10 subaxnimo iyo 4 galabnimo goobtuna waa:

Refugee Council Stoke-on-Trent outreach service

Piccadilly Centre, 59 Piccadilly,
Hanley, Stoke-on-Trent ST1 1HR

Fadlan la kaalay dukumentiyadaada UKBA iyo imigarayshanka ee la xidhiidha su'aashaada marka aad soo booqanaysid xafiiskayaga.

Fadlan u fiirso: Waxa aanu ku shaqeynaa hab qofka ugu soo horeeyaa ayaa loogu hor adeegayaa waxana aanu maalintii arki karnaa kaliya tiro xad leh oo ah macaamiil leh ballan. Haddii aad rabtid in lagu arko isla maalinta booqashadaada waxa aanu si xooggan kugula talinaynaa inaad noo timaadid inta u dhexeysa 9.30 subaxnimo – 10.00 subaxnimo. Haddii arrintaadu degdeg tahay, fadlan soo booqo xafiiskayaga Khamiista ama Jimcaha. Maalmaha aanu ugu mashquulsan nahay waa Isniinta iyo Salaasada.

Haddii aad rabtid in aad ka dacwootid arrin ku saabsan adeeggayaga, fadlan na weydiiso koobiga habka dacwadda iyo foomka dacwadda. Dhamaan dacwooyinka si buuxda ayaa loo baadhi doonaa.

Qoraalo uu leeyahay Golaha Qaxootiga oo tarjuman ayaa laga heli karaa:
<http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Sida na loogu yimaado

Xafiiska Refugee Council Birmingham

3 Lionel Street, Birmingham B3 1AG


Teleefonka Dhexe: 0121 234 1950 - waxa uu shaqeyaa Isniin, Salaasada, Khamiista, iyo Jimcaha 9.30 subaxnimo – 5 galabnimo

Khadka La-talinta: 021 234 1971 furan Isniin ilaa Jimce 9.30 subaxnimo ilaa 5 galabnimo

www.refugeecouncil.org.uk

Basaska: 7, 16, 16A, 46, 46A, 91, 74, 79, 91, 424

Tareeno: socod labaan daqiiqadood ah laga bilaabo rugaha New Street ama socod ah 10 daqiiqadood laga bilaabo rugaha tareenka ee Snow Hill. Golaha Qaxootigu waxa uu ka soo horjeedaa baarkinka baabuurka ee NCP ee Lionel Street.



Sidee buu Golaha Qaxootiga (Refugee Council) ee West Midlands kuu gargaari karaa?



No: N200100132



British Refugee Council (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No. 2727514] and a registered charity, [No. 101445776]
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom
VAT reg no: 936 519 988

